

Nin oday ah marku ninkaaga yahay

An old man as a husband



✎ Aranya

👤 Sunniva Høiby-Øiset

📄 Mohamed Abdirashid

🔊 5

🗣️ Soomaali / English



LIDA Stories


lidastories.net

Nin oday ah marku ninkaaga yahay / An old man as a husband

✎ Aranya

👤 Sunniva Høiby-Øiset

📄 Mohamed Abdirashid (so)



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



Waxaan u maleeynaye in ragga Norwiiijiga ay yihiin ragga ugu fiican adduunka, balse taasi run maaha! Kahor intaan la kulmin ninka noqday ninkayga, waxaan ka shaqeeynaye Warshad ku taal Bangkok, wuxuu ku noolaa Pattaya. Waxaan ku kulanay internetka oo aan ugu dambeyntii noqonnay lamaane.


...

I thought Norwegian men were the best men in the world, but that is not true! Before I met the man who became my husband, I worked in a factory in Bangkok, and he lived in Pattaya. We met through the Internet and eventually became a couple.

After a while we decided to get married. I came from a poor family, so having a foreign husband who could take care of my family was part of my reason for marrying him.

...

Muddo ka dib waxa aanu go'aansanay in aanu is guursano. Waxaan ka soo jeedaa qoys sabool ah, markaas in aan haysto nin ajnabi ah oo daryeelli kara qoyskayga waxay qayb ka ahayd sababta aan u guursaday.





Waxaan u soo guurnay Norway, waxaanan bilaabay in aan aado iskool si aan u barto Norwejiga. Waxay ahayd waqti adag. Maan haysan shatiga darawalnimada, ninkaygu waxa uu ku qasbanaaday in uu ii kaxeeyo iskoolka, isugo, dibna isoo celiyo. Waxay ahayd meel saacad noo jirta. Muddo ka dib waanu isku soo dhawaanay, laakiin wuxuu weli ku adkaystay inuu iskoolka ii wado. Ma uu rabin in aan keligay socdo.

...

We moved to Norway, and I started going to school to learn Norwegian. It was a difficult time. I did not have a driver's licence, and my husband had to drive me to school, wait for me, and drive back. It was an hour each way. After a while we moved closer, but he still insisted on driving me to school. He did not want me to walk alone.



Wax lacag ah ma helin tan iyo markii aan Norway imid. Mar ninkeygu wuxuu i siiyay lacag aan ku gadeeyo, laakiin maadaama aan haysto lacag aad u yar, waan xafiday. Saaxiibadayda iskoolka waxay rabaan inay i caawiyaan si aan shaqo u helo, laakiin ninkeyga wuxuu leeyahay ma awoodi karo. Uma maleynayo aan ka shaqada nadiifinta aysan igu habbooneen aniga.

...

I have hardly had any money since I came to Norway. Once, my husband gave me money for lunch, but since I had so little money, I kept it. My friends at school want to help me to get a job, but my husband says I cannot. He does not think working as a cleaner is appropriate for me.



Ma garanayo waxa mustaqbalka noqon doono. Qorshahaygu waa inaan iskool kale aado, laakiin ninkeygu ma rabo inaan taas sameeyo. Waxa uu qorshaynayaa inuu iga sii fogaayo si uu iigu adkeeyo. Waxaan rabaan inaan iska celiyo, laakiin ma garanayo sida. Ma fududa in dal shisheeye kula noolaado nin oday ah sidii ninkeyga oo kale sida aan moodayay inay noqon doonto.

...


I do not know what the future will bring. My plan is to go to another school, but my husband does not want me to do that. He is planning to move further away to make it difficult for me. I want to resist, but I do not know how. It is not as easy to live in a foreign country with an old man as a husband as I thought it would be.



Taa beddelkeeda shaqo kale ayuu ii qabtay – oo ah dhisitaanka geerashka. Waxa uu ahaa masuulka anigana wax walbana waan sameenayey. Wax badan ma uu qaban karin sababtoo ah wuu xanuunsanaa. Lacagtii uu ku dhisay geerashka waxba igamuusan siin.

...

Instead he had another job for me – building a garage. He was the boss and I did everything. He could not do much because he was ill. He did not give me any of the money he made from building the garage.



Maalin ayuu yiri waan ku caajisaa markuu guriga keligiis joogo, markaas ayuu go'aansaday inaan ey keensano. Ma rabin eey maadaama aan daalanahay iskoolkaa ka dib, waxaan lahaa casharo la iga rabo inaan kaga shaqeeyo guriga. Waxa uu sheegay in uu socodsiin doono eeyga maalin kasta, laakiin ugu dambeyntii waa in aan daryeelo labadaba eeyga iyo ninkeyga odayga ah.

...

One day he said he was bored when he was home alone, so he decided we should get a dog. I did not want a dog as I was tired after school and I had homework to do. He said he would walk the dog every day, but in the end I had to take care of both the dog and my old husband.